

MA KU WADAYSAA GAARI BARAFKA

Haddii aad ka fogaan karto, gaariga ha ku wadin barafka. Haddii ay qasab ku noqoto, raac talooyinkan badbaadada ah:

- **Ka fogow safarka habeenka ee barafka dusheeda**—gaar ahaan marka uu baraf da’ayo ama ay ceeryaamo jirto. Haddii ay lama huraan noqoto, si aad ah uga taxaddar oo si tartiib ah u wad, maadaama ay godad si degdeg ah u furmi karaan.
- **Daaqad hoos u dhig oo albaabbada fur** ama wax yar ka fur si baxsigu u fududaado.
- **Ha xiran jaakad sabeyn ah marka aad gudaha gaariga ku jirto**—laakiin meel kuu dhow dhig. Ballaca dheeraadka ah wuxuu caqabad ku noqon karaa baxsiga daaqadda.
- **Ha ku laaban gaari qayb ahaan biyo galay** si aad u soo qaadata qalab ama alaab kale.

KA BIXITAANKA GAARIGA

Haddii gaarigaaga ama baabuurka xamuulka ah uu barafka la go’o:

- Isla markiiba isku day inaad ka baxdo adigoo ka baxaya albaab ama daaqad dhinac ah. Gaarigu wuxuu sabeyn karaa dhowr ilbiriqsi ilaa dhowr daqiiqo.
- Haddii daaqadaha iyo albaabbadu furmi waayaan, daaqad dhinac ah jabso adigoo adeegsanaya qalab, birta suunka kursiga, ama laad, kadibna ka bax daaqadda dhinaca ah.
- Haddii gaarigu uu bilaabo inuu quuso, raadi gacanta albaabka laga furo oo sii wad isku dayga ah furitaanka albaab ama daaqad. Marka biyuhu buuxiyaan gaariga, furitaanku wuu fududaan karaa.
- Albaabka riix oo ka bax gaariga. Gaarigaagu wuxuu ku degi karaa saqafka. Si aad jihada u ogaato, isticmaal sabeynta dabiiciga ah ee jirkaaga si ay kuu hagto marka aad u dabaalanayso dusha sare.

HUBSO OO KA FIIRSO LABA JEER KA HOR INTAADAN GAARI KU WADIN BARAFKA BARAFKU MARNABA 100% AMMAAN MA AHA! Dhumucda Ugu Yar ee Barafka ee Lagu Taliyay



mn DEPARTMENT OF NATURAL RESOURCES

500 Lafayette Rd
St. Paul, MN 55155-4040
651-296-6157 or
888-MINNDNR (646-6367)
mndnr.gov

Minnesota DNR waxay mamnuucdaa takooridda barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda iyadoo lagu salaynayo jinsi, midab, caqiido, diin, asal qaran, lab ama dheeddig, xaalad guur ama qoys, naafo, xaaladda kaalmada dadweynaha, da', nooca jiheynta galmada, iyo hawlaha guddiyada xuquuqda aadanaha ee maxalliga ah. Dadka naafada ah ee u baahan fududeyn macquul ah si ay u helaan ama uga qaybqaataan barnaamijyada iyo adeegyada DNR, oo ay ku jiraan kuwa doonaya dukumeentigan oo qaab kale ah, waa inay la xiriiraan Isu-duwaha DNR ADA Title II iyagoo adeegsanaya info.dnr@state.mn.us ama wacaya 651-296-6157. Waxaan soo dhoweyneynaa wicitaannada isticmaaleyaasha Telecommunications Relay Service (TRS). Caawimaad luqado kale ah, fadlan wac 651-296-6157 ama 888-MINNDNR (646-6367). Su'aalaha la xiriira takooridda waa in loo diraa Minnesota DNR, 500 Lafayette Rd, St. Paul, MN 55155-4049.

©2026, State of Minnesota, Department of Natural Resources (Gobolka Minnesota, Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah)

Waxaa lagu daabacay warqad lagu sameeyay Minnesota oo ka kooban 10% qashin dib loo warshadeeyay oo kadib ahaan loo isticmaalayo.

mn DEPARTMENT OF NATURAL RESOURCES

KHATAR! BARAF KHAFIIF AH



TALOYINKA BADBAADADA BARAFKA

Barafku marna 100% ammaan ma aha. Si aad khatarta u yarayso marka aad ku jirto biyo barafaysan, qaado tallaabooyinkan:

- Heerkulka hubi, haku kalsoonaan jadwalka kaligiis. Heerkulka hawada iyo cimilada dhow waxay si weyn u saameeyaan tayada barafka. Sababtoo ah barafku sanadkii hore maalintan oo kale ayuu ammaan ahaa, macnaheedu ma aha inuu sanadkan ammaan yahay.
- La tasho khubaro deegaanka iyo ilo warbixin ah si aad u hesho xogta hadda jirta ee barafka iyo meelaha khatarta ah ee la yaqaan.
- Qof u sheeg meesha aad aadeyso iyo waqtiga aad filayso inaad soo noqoto. Qaado telefoonka gacanta iyo/ama qalab calaamadeeya goobtaada, kuna hayso meel kuu dhow haddii dhibaato dhacdo.
- Xiro jaakad sabeyn ah ama qalab sabeyn marka aad barafka dul saaran tahay (gaariga gudahiisa mooyee). Haddii aad biyaha ku dhacdo, jaakad ama koodh buufsamaad leh wuxuu madaxaaga ka haynayaa biyaha korkooda wuxuuna kaa ilaalinayaa qabowga.
- Had iyo jeer qaado qalabka badbaadada barafka: xarig, qodaxyo baraf, faas baraf ama qodista, iyo cabbir. Si joogto ah u hubi dhumucda barafka. Ogaaw sida loo isticmaalo qodaxyada si aad naftaada u badbaadiso iyo xarigga si aad dadka kale u badbaadiso.



XAQIIQOYINKA DHABTA AH EE KU SAABSAN BARAFKA

Xaaladda barafka laguma qiimeyn karo muuqaal ama dhumuc keliya. Arrimo badan—sida qoto dheerida biyaha, cabbirka meelaha biyaha, kiimikada biyaha, qulqulka, daboolka barafka dusha saaran (snow), da'da barafka, iyo cimilada deegaanka—ayaa wada go'aamiya xooggiisa.

Barafka cusub badanaa waa ka xoog badan yahay kan duuga ah. Afar inji oo baraf cusub oo saafi ah ayaa qaadi kara hal qof oo lug ku socda, halka hal fiit ama ka badan oo baraf duug ah oo qayb ahaan dhalaalay laga yaabo inuusan qaadi karin.

Barafku si isku mid ah uma barafoobo. Hal meel wuxuu ka dhumuciisa ka noqon karaa hal Feet, meel dhowna wuxuu ka noqon karaa hal ama laba inji oo keliya. Barafka u dhow xeebta wuxuu ka daciif badan yahay kan yaala meelaha xeebat ka fog. Markaad socoto, hubi dhumucda barafka.

Barafka ka samaysma biyaha socda iyo qulqulka badanaa waa khatar. Tani waxay si gaar ah uga jirtaa meelaha durdurrada, ilaha biyaha, marinada u dhexeeya harooyinka, buundooyinka, tuubooyinka, iyo nidaamyada hawada lagu geliyo biyaha. Sidoo kale, barafka leexashada webiyada bannaanka ah badanaa waa ka daciifsan yahay sababtoo ah qulqulka degdegga ah.

Barafka dusha saaran (snow) wuxuu gaabiyaa barafoobidda. Culayska dheeraadka ah ee barafka dusha yaal wuxuu sidoo kale yareeyaa culayska uu qaadi karo barafku. Ka qaad barafka dusha ka hor intaadan tijaabin dhumucda iyo midabka barafka.

Ka fiirso dillaacyo waaweyn, godad, ama meelaha cadaadiska leh ee barafka, kana fogow meelahaas.

Kalluunka dhaqaaqaya wuxuu keeni karaa biyo diirran oo ka yimaada hoose, shimbiraha biyahana waxay diirin karaan dusha barafka, taasoo sababi karta godad furma oo khatar ku ah dadka barafka ku socda.

Macluumaad dheeraad ah iyo tilmaamo badbaado, booqo: mndnr.gov/icesafety

WAC, GAAR, TUUR, DOON, HA TAGIN

Si aad qof uga samatabbixiso baraf ama biyo, raac shantan tallaabo:



WAC

Wac 911 haddii aad haysato telefoon gacanta ah. Ku qayli qofka dhibban si aad u dhiirrigeliso inuu sii noolaado, una xaqiiji in gargaar soo socdo.



GAAR

Haddii qofka dhibaateysan aad si ammaan ah uga gaari karto xeebta, u tuur shay sida xarig, jaranjaro ama fiilooyin koronto (jumper cables). Haddii qofku bilaabo inuu ku jiido, sii daa shayga oo dib u bilow. Ha u orodin afka godka, tani waxay keeni kartaa laba qof oo biyaha ku dhaca.



TUUR

Xeebta ka tuur hal daraf oo xarig ah ama shay sabeyn kara oo u tuur qofka dhibban. U sheeg inuu isku xiro ka hor inta uusan qabowgu ka daciifnin awooddiisa qabashada.



DOON

Raadi doon fudud oo aad ku riixdo dusha barafka. Xiro jaakad sabeyn oo qaado qodaxyo baraf iyo qalab sabeyn la tuuri karo. Xarig ku xir doonta si dadka kale ay kaaga caawiyaan jiidista adiga iyo qofka dhibban. Doonta u riix ilaa afka godka, gal doonta kadibna qofka ka soo jiid dhinaca hore.



HA TAGIN

Qof aan xirfad lahayn ha u bixin barafka si uu u sameeyo samatabbixin adigoon haysan qalab aad naftaada ku badbaadin karto. Tani waxaa ka mid ah inaad qaadato qodaxyo baraf, xirato jaakad sabeyn, isla markaana aad si adag ugu xiran tahay xarig qof kale haysto oo ku soo jiidi kara.

NOQO QOF BADBAADA

Waa inaad dadaal sameysaa si aad uga badbaado biyo qabow. Xafid qorshahan ka hor intaadan barafka fuulin:

1. Ha argagixin! Qabowga biyaha wuxuu keeni karaa inaad neefsato biyo ama si xad-dhaaf ah u neefsato. Neefsashada xakamee.
2. Dharka jiilaalka ha iska bixin. Dharka culus kuma quusinayo, balse wuxuu qabtaa hawo kaa caawisa kuleyl iyo sabeyn. Tani waxay si gaar ah ugu jirtaa dharka mootooyinka baraf.
3. U jeeso jihadii aad ka timid. Halkaas ayaa baraf adag u badan yahay. Caawimaad u qayli.
4. Gacmaha iyo cududaha saar dusha barafka adag. Isticmaal qodaxyo baraf, musbaaro ama qalab fiiqan si aad isu jiiddo.
5. Lugaha riix oo qodaxyada ku qod si aad dib ugu fuusho barafka adag.
6. Markaad baxdo, ku jifso barafka dushiisa oo is rogrog si culayskaagu u kala firdho. Tani waxay kaa caawin kartaa inaad mar kale barafka kula jabin.
7. U guur meel diiran, qalalan oo daboolan, isla markiibana is kululee. Haddii qabowgu kugu bato (hypothermia), waa inaad raadsataa daryeel caafimaad. Dhiig qabow oo ku xanniban gacmaha iyo lugaha ayaa dib ugu soo laaban kara wadnaha markaad kululaato. Saameynta dhiigga qabow waxay sababi kartaa qalqal wadnaha (ventricular fibrillation) oo keeni kara wadne-istaag iyo dhimasho.

BARAFKU MARN 100% AMMAAN MA AHA!